

Digniin! Hadda waxaa socda faafitaankii ugu badnaa gobolka Kalmar!

Hadda si 'aad ah ayuu cudurku ugu faafayaa gobolka Kalmar, si kabadan gobolada kale ee waddanka, sidaa daraadeed ayey dhakhtaradda cudurada faafa Lisa Labbé Sandelin u aragtaa in xaaladdu tahay mid adag , xakameen dheeraad ahna waa la saaray gobolkeena.

- Dadka waa weyni looma ogola iney gudaha jimicsi ku sameeyaan.
- Dhalinyarada tartantaa waa in aaney ka qayb gelin tartan cayaareed.
- Waa inaad qaban qaabin xaflad, casuumado cunto ay dad badani ku kulmayaan, ama qabasho xafladah sida kuwa ciidaha.

Waxay soconaysaa ilaa iyo 16-ka bisha maajo!

Istalaal-si waddanku iyo bulshaduba dib ugu furmaan!

Marka inta badan ee dadka is talaalaan ayaa bulshadu dib isugu furmi kartaa. Gobolkeena Kalmar talaalku da' buu ku socdaa, ee ogow marka da' daada lasoo gaaro, kuna dhakhso istaalidda. Waa inaan is caawinaa! Wasiirka arrimaa Bulshada Lena Hallengren waxay tiri 30% dadka qaankaarka ah waxay heleen talaalka qaybtii 1-aad. Waa arrin fiican , waase inaan intaa kasii fiic naanaa. Sida ugu dhakhsaha badan ee aynu isu talaalno ayey ku xirantahay in ay si dhakhsaha ay bulshadu isugu furanto.

Gobolkeena Kalmar hadda waxaa talaalku ku socdaa dadka da'doodu tahay 50 ilaa 59 jir. Wax warqad ah la iidin masoo dirayo ee adiga waqtiga talaalka samayso hadda.

Waxaad iska talaali kartaa xaruntaada caafimaad ama mid ka mid ah sadexda xarumood ee

waaweyn, ee ku kala yaala, magaalooyinka Kalmar, Oskarshamn iyo Västervik. Laakiin waa inaad MARWALBA waqti samaysataa intaadan tegin.

Kasamayso waqtiga 1177.se haddii luqadda ingiriiska ama inyar oo iswiidhish ah taqaanid. Haddii kale wac xarunta caafimaadka ee gobolka warsana iney kugu xiraan xaruntaada caafimaad. Ka wac xarunta gobolka telefoonkan: 0480-84000.

Waxaa khatar ah in feeyrusku isbadelo haddii aan dhakhso loo joojin. Waxaa kaloo khatar ah in cudurku markale qarxo haddaan dadka intooda badan la talaalin. Sidaa darteed waa muhiim inaad dhakhse isu talaasho!

Nagu caawi inaad fidiso macluumaadka is talaalidda.

Hay'adda caafimaadku waxay tiro koob ahaan aragtaa in dadbadan oo ah dadka waddanka dibadiisa ku dhashay , aay ku yartahay is talaalidda. Hay'adda caafimaadku waxay ka wel welsantahay in dadkani ay ku adagtahay ineey warbixinta talaalka ah helaan. Sidaa darteed gacan ka geeysa inad dadka gaarsiiso iyo sida leysu talaalilahaa.

Beyjka internetka ee hay'adda caafimaadka waxaa ku jira filmaan luqado kale oo aan af iswiidhish ahayn ah.

